

# *Qaan-celinta waa lacagta amarka garsooraha uu dembiile dhallinyar ama weyn uu ugu xukumayo taas oo qayb ka ahaanaysa xukunka dembiga. Waxa ay ku salaysantahay qasaaraha dhibbanaha uga yimid iyo dembiilaha awoodda uu u leeyahay in lacagta uu ku bixiyo.*

## **KORMEERISTA LACAGTA QAAAN-CELINTA**

Caadi ahaan, dembiiluhu waxa lagu amrayaa in uu qaan-celinta ku bixiyo nidaam lacag bixina ee jadwal leh. Sarkaalka siidaynta shuruudda dembiilaha ayaa masuul ka ah qaabka lagu dhisayo jadwal lacagta lagu bixinayo iyo kormeerista lacagaha dhibbanayaasha loo dirayo. Haddii dembiiluhu aan la gelin kormeerista siidaynta shuruudda, kaaliyaha ama sarkaal kale ayaa diyaarinaya jadwalka lacagta lagu bixinayo. Haddii dhibbanayaasha aan la lasiin jadwalka lacagta lagu bixinayo, waa in ay la xariiraan dembiilaha sarkaalkiisa siidaynta shuruudda ama kaaliyaha maxkamadda.

Haddii aysan jirin jadwal lacagta lagu bixinayo, markaasi qaan-celinta waa in la bixiyo maalinka xukunka uu dhacayo. Degmooyinka qaarkood, amarka qaan-celinta waxaa qandaraas ku qaadanaya hay'ad lacagaha soo uruuriya. Wax ujjraa ah lagama qaadi doono lagacaha nidaamkan lagu soo qabto.

Haddii dembiiluhu uu xabsi ku jiro, dhibbanayaasha waa in ay maxkamadda la soo xariiraan ama Barnaamijka Gargaarka Dhibbanaha ee Minnesota ee laga helo Waaxda Asluubta Minnesota Department of Corrections (800-657-3830) si lagu habsado in amarka qaan-celinta rugta xabsiga loo diray. Rugaha asluubta waxa ay lacagaha qaan-celinta dhibbanayaasha ugu diraan dhowr qaab ee jadwallo. Qaarkood waa ay lacagta qaan-celinta ugu diraan bil ka bil ama rubaclaha, halka qaar kalena laga yaabo in ay lacagta qaan-celinta ku diraan hab sanad ku salaysan. Waxaa muuhima in dhibbanayaasha ay u sheegaan karaaniga iyo sarkaalka rugta asluubta haddii ay jirto cinwaan la baddalay.

## **HADDII DEMBIILUHU UU LACAGTA BIXINWAAYO**

Haddii dembiiluhu aanu ku bixin qaan-celinta sida ku qoran jadwalka heshiishka iyo isla markaana uu ku jiro siidaynta kormeeran, dhibbanayaasha xaq ayay u leeyihiin in la qabto dhegaysi dib loogu eegayo siidaynta kormeeran iyado lala soo xariirayo sarkaalka asluubta. Sarkaalka asluubta waxa uu waqti kasta ee lagu jiro muddada 60ka kahor inta aysan dhammaan mudda uu dembiilaha ku jiro siidaynta kormeeran. Marka dhegayga dhacayo, garsooraha waxa uu kordhin karaa muddada siidaynt kormeeran dembiilaha si lagu helo waqti dheeraada ee lacagta magdhawga lagu bixinayo.

Haddii dembiilaha xabsiga laga siidaayay, asaga ama ayada waxaa loo qabsan karaa in ay masuul ka yihiin lacagta bixinteeda inta ay ku jiraan siidaynta kormeeran.

## **FURSADAHA KALE EE DIB U BIXINTA LACAGTA**

Jiritaanka magdhawga ay maxkamad amartay macnaheeda maaha in uu dembiilaha lacagta bixin doono. Kuwakan waa fursado kale qaarkood ee lagu caawinayo siday dhibbanayaasha kharash kaga baxay ee la xariira dembiga u heli lahaayeen.

### **Magdhawga Dhibbanaha Dembiga**

Magdhowga waxaa laga wadaa gargaarka dhaqaalaha ee laga helayo barnaamij dowladeed ee la siinayo dhibbanayaasha dembiyada culus ee gacan ka hadalka. Magdhawga lagu bixinayo qasaaraha hantiyeed. Foomanka dacwadda waxaa laga helaa Guddiga Magdhawga Dhibbanayaasha Minnesota Crime Victim Reparations Board ee laga wacayo 651-201-7300 ama shabakadda Xafiiska Barnaamijyada Sharciga Internetka ee laga galo [dps.mn.gov/divisions/ojp](https://dps.mn.gov/divisions/ojp). Ma jirto wax ujjraa ee arjig laga qaadayo. Dhibbanayaasha u qalma waxaa magdhawga lagu siinaya wax hoos imaanaya barnaamijka magdhawga xitaa haddii aanan wax arji ah kiiska laga soo xarayn.

### **Xukun Madani ah**

Meesha kale ee dhibbanayaasha ay kaga dacwoon karaan qaan-celintaga waa maxkamadaha madaniga. Si lagu helo amarka qaan-celinta ee “ballan looga qabsaday”, ama lagu diiwaangaliyo xukun madaniya, dhibbanaha waa in uu maxkamadda ka xaraysataa *Affidavit of Identification of Judgement Debtor (Qoraalka Dhaarta ee Aqoonsiga Xukunka Deyn-Qabaha)*. Xukunka madaniga waxa uu dhalinaya xaalad ah in rahaamad laa galiyo deymaha iyo hantida maguurtada ee dembiilaha/deyn-qabaha illaa magdhawga la wada bixiyo. Xukunka waa mid lagu fulinayo illaa 10 sanadood waana la cusbonaysiin karaa.

Xaraynta malaha ujjro laga qaadayo dhibbanaha ku xusan amarka qaan-celinta. Mar haddii la xareeyo xukun magadaniya, macluumaadka ku saabsan dhibbanaha shaaca ayaa laga qaadaa.

Dhibbanayaasha waxa ay adeegsan karaa qaabab ay maxkamadaha madaniga uga furan karaan ururinta

waxa la xakumay, tusaale, in mushaarka ama akawanka bangiga lacag laga qabto. Dhibbanayaasha aan hayn xogta halka uu dembiilaha ka shaqeyo ama bangiyada uu lacagta dhigto ayaa kaaaliyaha maxkamadda uu kala xariira karaa si Request for Order of Disclosure (Amarka Codsiga Siidaynta) uga xaraysto si lagu helo macluumaadka dhaqaalaha dembiilaha. A Writ of Execution (Warqadda Amarka Fulinta), oo iyana laga soo qaatay kaaaliyaha maxkamadda, ayaa la isticmaalayaa si lagula wareego hantida lagu bixinayo deynta. Sarkaalka bolliiska ayaa fulinaya A Writ of Execution (Warqadda Amarka Fulinta) taaso ujjra layska rabo. Hantida qaarkeed ayaa dhici karta in aan qaabkan lagula wareego, laakiin waxyaabo ayaa kaga reebaya waxa lala wareegayo.

Macluumaadka iyo foomanka ku saabsan hawl socodsiiintan waxaa laga helayaa karraaniga maxkamadda xaafadda ama shabakadda Laanta Garsoorka Minnesota Judicial Branch oo laga gelayo [www.mncourts.gov](http://www.mncourts.gov).

### **La Wareegidda Dakhliga**

Degmooyinka qaarkood waxa ay dacwooyinka qaan-celinta aan la bixin u diraan Waaxda Dakhliga Minnesota ee “Revenue Recapture” (“La Wareegidda Dakhliga”) Marka sidaan wax lagu hawl-socodsiiyo, lacagta qaan-celinta aan la bixin ee dacweysanaha lagu leeyahay, sida dakhliga canshuurta ka soo noqonaya, hantida canshuurta ka soo noqonaysa, lacag celinta kireystayaasha, lacagta deeqaha siyaasada lagu bixiyo, iyo lacagaha baqtiya nasiibka lagu helo ee \$1,000 doollar dhaafsiisan. Lacag bixin kasta ee la soo qabtana waxaa la saaraya ujjro.

### **Qareenka Gaarka/Hay'ad Lacagta Qabata**

Dhibbanayaasha waxa ay isku dayi karaan in ay qabsadaan qareen gaar ee u soo uruuriya lacagta qaancelinta ayado hay'adda lacag uruurinta lala kaashanayo. Laakiin waxaa jirta in qarashyada ka yimaada hawlahaan ay kala duwan yihiin, qiimaha ku kacana ay aad hoos u dhigayaan waxtarka laga heli lahaa qaan-celinta.

Haddii eedeysanuhu yahay dhallinyaro, waalidka eedeysanaha ayaa masuul ka noqonaya lacagta magdhawga illaa \$1,000 gaarsisan. Dacwad madani ee ka duwan ee caadi ahaan lagu qabto maxkamadda heshiisiinta ama “maxkamadda dacwadaha yar-yar”, ayaa waalidka la soo taagayaa. Xaraynta ama ujjrada maxkamadda aya lagu soo darayaa hawlahaan lacagta lagu soo ceshanayo.

Macluumaadka ku saabsan tallaabo lagu qaadayo maxkamadda dacwadaha yar-yar waxa laga helayaa kaaliyaha maxkamadda ama shabakadda Laanta Garsoorka Minnesota Judicial Branch ee laga galayo [www.mncourts.gov](http://www.mncourts.gov).

## SU'AALAHA LA ISWEYDIYO EE KU SAABSAN QAAN-CELINTA

**Dembiiluhu ma laga rabaa Lacagata qaan-celinta in uu si toosa u siiyo dhibbanaha?** Maya dembiilaha waxaa laga rabaa in uu lacagta qaan-celinta uu si toosa ugu diro kaaliyaha maxkamadda. Kaaaliyaha ayaa markaa jeeg dhibbanaha u diraya. Meelmarinta hawshan waxaa dhici karta in ay dhowr toddobaad qaadato.

**Ma dhici kartaa in dembiilaha uu maxkamadda weydiisto in ay wax ka baddasho amarka?** Dembiiluhu amarka maxkamadda ee qaan-celinta waa uu ka doodi karaa isagoo maxkamadda ka dalbada dhegaysi. Dhibbanaha waxaa dhici karta in la weydiyo warqado dheeraada ee uu ku caddaynayo kharashka ku xusan amarka qaan-celinta.

**Ma dhici karta in amarka qaan-celinta wax laga baddalo oo la soo raaciyi kharash dheeraada?** Maxkamaddu waxay wax ka baddali kartaa ama soo saari kartaa amarka qaan-celinta kaddib marka uu xukun ama go'aan la baxshay haddii (1) uu dembiilaha uu sharci ahaan maxkamadda aysan hawshiisa ka dhammaan, (2) in dhibbanaha uu maxkamad horkeenay caddayn buuxda ee qaan-celinta uu ugu xaqleeyahay, iyo (3) in aan la hayn macluumaadka qasaaraha dhabta ah ee soo gaaray dhibbanaha marka uu xukunka dhacay, dacwadda la xiray, ama dhegaysiga qaan-celinta uu socday. Xaqiiqadu waxa ay tahay, in ay aad u adagtahay in amarka la baddalo, sidaa awgeedna dhibbanaayasha waxaa lagula talinayaa in ay khasaarahooda caddeeyaan maxkamaddana ay horkeenaan warqadaha kahor inta aan la xukumin ama go'aan laga bixin.

**Ma laga yaabaa in dulsaar la saaro deynta qaan-celinta?** Dulsaar uma kordhayo amarka qaan-celinta ee kiisaska dembiyada. Laakiin, mar haddii amarka qaan-celinta la diwaangaliyo sida xukun madaniga, dulsaarka lacagta xukunka madaniga ee aan la bixin waxaa xisaabinaya karraaniga maxkamadda waxayna sii kordhaysaa illaa lacagta la wada bixiyo.

## WAXA KU SAABSAN QAAN-CELINTA

Qaan-celinta waa lacagta amarka garsooraha uu dembiile dhallinyar ama mid weyn uu ugu xukumayo taas oo qayb ka ahaanaysa xukunka dembiga. Waxa ay ku salaysantahay qasaaraha dhibbanaha uga yimid iyo dembiilaha awoodda uu u leeyahay in uu lacagta ku bixiyo.

Qasaaraha dhibbanaha soo gaaray ee la xariira dembiga waxa ka mid ahaan kara: kharashka duugista; kharashka caafimaadka, ilkaha iyo baxnaanista; khasaaraha mushaarka; khasaaraha hantida; iyo kharashka ku baxay kabitaanka hantida burburtay.

Inkasto qaan-celinta uu ka mid yahay xukuna ama go'aan ay maxkamada wax ku xallisay, dhibbanayaasha helitaanka lacagta qaan-celinta hubaal maaha. Aruurinta lacagta qaan-celinta waa noqon kartaa mid ayaan darro ah oo cakiran si ay u gaarto dhibbanayaasha iskudayaya soo kabashada waxa u keenay niyadjabka, dhaawaca jireed, qasaaraha maaliyadeed ee ka soo gaaray falkii dembiga. *Aruurinta Qaan-celinta ay Maxkamad Amartay* ayaa lagu fasirayaa nidaam lagu aruurinayo magdhawga iyo lagu helayo dhaqaale lagu kabayo qasaaraha ka dhashay dembiga.

### NALAGA SOO XIRIIR

Office of Justice Programs  
445 Minnesota Street, Suite 2300  
St. Paul, MN 55101-1515

limayl: [dps.justiceprograms@state.mn.us](mailto:dps.justiceprograms@state.mn.us)  
Shabakadda internetka: [dps.mn.gov/divisions/ojp](http://dps.mn.gov/divisions/ojp)

651-201-7300 Telefoonka Guud  
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta  
651-205-4827 Khadka Dadga Maqalka Culus (TTY)  
651-296-5787 Fakis

6/11

COLLECTING RESTITUTION - SOMALI

# ARUURINTA QAAN-CELINTA AY MAXKAMAD AMARTAY



XAFIISKA BARNAAMIJKA  
CADDALADDA

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA

OFFICE OF JUSTICE PROGRAMS  
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY